BERGEN KOMMUNE

# KU SOO DHOWOOW WAAXDA MAAMMULKA GURYAHA



# WARBIXIN MUHIIM U AH DADKA GURYAHA DEGGAN

Waaxda Maammulka iyo Dayactirka Guryaha (EBF) ayaa ku soo dhoweynaysa adiga oo ah kiraystaha guriga. Buug-yarahaan waxaa ku qoran warbixin muhiim u ah qofka kireysanaya guri ay degmadu leedahay. Waxaad leedahay xuquuq iyo waajibaad labadaba. Inta ugu muhiimsan ayaanan ku sharraxaynaa buug-yarahaan.

EBF ayaa leh, maammusha oo kireysa guryaha degmada Bergen. Waxaan isu geyn leennahay qiyaastii 5300 oo guri oo isugu jira guryo kiro ah oo caadi ah, guryaha dadka cudurrada dhimirka, guryaha dadka lagu daryeelo iyo guryaha dadka garaadkoodu dhimman yahay. Guryo ayaan ku leennahay xaafadaha degmada oo dhan.

Degmada Bergen laamo badan ayaa bixiya guryaha degmada. Waaxda Guryaha (Boligetaten) ayaa ka baaraandegta codsiyada guryaha degmada ee caadiga ah, isla waaxdaas ayaana bixisa guryaha kirada ah ee degmada oo dhan. Xafiisyada qiimaynta ayaa bixiya guryaha daryeelka iyo guryaha daryeelka waayeelka. Qaybta maammulka caafimaadka dhimirkuna waxay bixisaa guryaha dhimirka, waaxda adeegyada dadka garaadkoodu dhimman yahayna waxay bixisaa guryaha dadka garaadkoodu dhimman yahay.

EBF ayaa heshiiska kirada guriga la gasha qofki guri la siiyo. Waxaan mas'uul ka nahay in aan hubinno in gurigu buuxiyay shuruudihii laga rabay.



# TUSMADA



Bogga. 1 **YAAD LA XIRIIRAYSAA?**

Bogga. 2 **MAS'UULIYADDA KIREYSTAHA**
Koronto
Caymis
Boostada iyo Xafiiska diiwaanka dadweynaha
TV iyo internet
Cabasho
Bogga. 3 Aagagga dadka ka dhexeeya
Dayactir
Qolal guud
Kiro guri
Bogga. 4 Dibaaji
Cusboonaysiinta kirada guriga
Beddelaadda guriga
Bogga. 5 Ka bixidda heshiiska kirada guriga
Sii kireynta guriga
Kaalmada guryaha

Bogga. 6 **WARBIXIN MUHIIM AH**
Cayayaan
Bogga. 7 Hawo-qaadista iyo kulka
Bogga. 8 Badbaadada dabka
Bogga. 10 Fiyuusyada
Bogga. 11 Qashinka
Biyaha
Bogga. 12 Bey'adda degaanka

Bogga. 13 **WARBIXIN MUHIIM AH**

Bogga. 14 **XEERARKA NIDAAMKA GURYAHA**

# YAAD LA XIRIIRAYSAA?

**WAAXDA MAAMMULKA GURYAHA (EBF)**
**Ciwaanka boostada:** Postboks 7700, 5020 Bergen
**Ciwaanka booqashada:** Kaigaten 4, dabaqa 2-aad (laga soo galo Peter Motzfeldts gate).
**Iimayl:** boligforvaltning@bergen.kommune.no
**Bogga internetka:** www.bergen.kommune.no/omkommunen/avdelinger/etat-for-boligforvaltning
Waxaad halkaan ka helaysaa warbixin ku saabsan EBF, meelaha aad kala xiriiri karto, foomam codsi oo kala duwan iyo filinkannaga warbixinta.

**XARUNTA MACAAMIISHA**
**Saacadaha furitaanka ee soo-dhoweynta:** Saacadaha 11.00 – 14.00 (khamiis, saacadaha 11.00 – 15.00).
Keenista furayaasha, foomamka la buuxshay waxaa santuuqa boostada ee EBF lagu xarayn karaa maalmaha shaqada, saacadaha 09.00 – 15.00
**Telefoon: 55 56 56 00**
Saacadaha telefoonka: saacadaha 08.00 – 14.30
**Qaybta dayactirka** – arrimaha sancada: **DOORASHADA 1**
FG! Saacadaha telefoonka: maalmaha shaqada, saacadaha 12.30 – 14.00
Kaalmada guryaha: **DOORASHADA 2**
Kiro guri iyo dibaaji: **DOORASHADA 3**
Gelidda heshiis kiro guri oo cusub: **DOORASHADA 4**
Arrimaha kale: Sug inta laguu jawaabayo

**TELEFOONKA SOO-JEEDKA LEH EE CAAWINTA SANCADA EE DEGDEGGA AH: 915 48 222**
Telefoonkaan isticmaal keliya marka aad u baahan tahay gargaar deg ah, sida biyo darrooraya ama dhaawacyo halis ah.
Saacada telefoonka ee maalin walba: saacadaha 08.00 – 23.00
Wixii ka danbeeya saacaddda 23.00, waxaad cilladaha waaweyn u gudbin kartaa Adeegga waardiyaha.

**ADEEGGA WAARDIYAHA: 55 56 78 78**
Adeeg 24 saac ah oo degdeg loola xiriiro waardiyayaal haddii ay dhacdo rabshad guri iyo wixii la mid ah.

# MAS'UULIYADDA KIREYSTAHA

## KORONTO

Waa mas'uuliyad kireystaha saaran in uu korontada dalbado. Marka aad gasho heshiiska kirada guriga, haddii aan wax kale lagu heshiin, EBF ayaa koontatooraha gurga u gudbinaysa shirkad koronto. Koontatooraha si otomaatik ah ayaa loo akhrinayaa umana baahnid in aad mitirka akhriso marka shirkadda loo gudbinayo ama si loo ogaado lacagta saxda ah ee korontada la isticmaalay bishiiba. Adiga kireystaha ah mar kasta oo aad doonto ayaad u wareegi kartaa shirkad koronto oo kale. Waxaan kugula talinaynaa in aad ogaato qiimaha shirkadaha kale ee korontada bixiya. Qiimaha korontada iyo shirkadaha korontada bixiya waxaad ka helaysaa www.strompris.no.

## CAYMIS

Haddii uu dab dhaco ama guriga la jabsado ama biyo waxyeelleeyaan EBF kuu magi mayso alaabta guriga. Alaabta guriga waxaa loola jeedaa dharka, saabaanka, qalabka iyo shay-yaasha kale ee guriga kuu yaalla. Sidaas darteed waxaa qof walba looga baahan yahay in uu caymis gashado alaabta guriga u taalla. Shirkad caymis ama bangi la xiriir si aad u gasho caymiska alaabta guriga.

## XUSUUSO IN AAD SHEEGTO IN AAD GUURTAY

Adiga ayaa mas'uul ka ah in aad ciwaankaaga cusub ka diiwaangeliso Xafiiska diiwaanka dadweynaha iyo boostada. Diiwaangelinta ciwaanka cusub (warge-linta guuridda) waxaa loo gudbiyaa skatteetaten.no. Kaalmada guryaha kuma codsan kartid ciwaan aan ahayn midka aad uga jirto Diiwaanka dadweynaha. Xusuusa in aad magacyada ku qorto santuuqaada boostada.

## TV IYO INTERNET

Qaar badan oo ka mid ah guryahannaga ayaa waxaa ku jira kaybalka TV-ga. Lacagta kaybalka TV-ga iyo midda internetku kuma jiraan kirada. Waa in aad iskaa ula xiriirtaa shirkadda kaybalka oo halkaas rukun ka noqotaa. Haddii aan kaybal guriga ku jirin, waxaa markaas la soo gashan karaan RiksTv ama internet aan fiilo lahayn. Guryaha EBF midna looma oggola in anteenno gaar ah lagu xirto.

## CABASHO

Haddii aad qabto in ay derisku jebiyeen xeerarka nidaamka guriga, markaas waa in aan helnaa cabasho qoraal ah. Foomka waxaad ka helaysaa bogogga internetka ee EBF. Waa in ay cabashada ku qornaadaan:

- Magaca dadka iyo/ama guriga laga cabanayo
- Faahfaahinta waxa laga cabanayo
- Wakhtiga iyo taariikhda saxda ah ee dhacdada

**AAGAGGA DADKA KA DHEXEEYA**

Qaybta hoose ee guryaha, qolalka kore iyo aagga qolalka u dhexeeya iyo aagga dibedda ah ee hareeraha guriga isticmaalkoodu wuxuu ka dhexeeyaa dadka guriga deggan. Waxaa muhiim ah in aad alaabtaada dhigato maqaasiinka lagu siiyay. Waa in aadan alaab dhigin marinnada qolalka hoose, meelaha guryaha loo maro iyo qolalka kore – sidoo kale alaabahaaga ha dhigannin maqaasi-innada maran ee guryaha kale. Alaabaha meelahaan la dhigto digniin la'aan ayaa la tuuri karaa. Aagagga dadka ka dhexeeya waxaa loo baahan yahay in ay hagaagsan yihiin, lamana oggola in sigaar lagu cabbo. Nala soo xiriir haddii aad aragto wax hallaysan. Waxyaalaha hallaysnaan kara waxaa ka mid ah guluub aan shaqaynayn, muraayad jaban, gambaleel aan shaqaynayn, albaabbo hallaabay iyo wixii la mid ah. Guri kasta ma laha ilaaliye mas'uul ka ah.

**DAYACTIR**

Haddii aad doonayso in aad guriga dayactirto ama qurxiso, intaadan shaqada billaabin ka hor waa in aad EBF la soo xiriirtaa si aad oggolaasho u hesho. In kasta oo aad adigu qabto in dayactirka loo baahan yahay, haddana taas lama mid ah in aan annaga guriga leh shaqadaas qabanayno ama bixinayno kharashka ku baxa. Ku talaggal in aad adigu bixiso. Kharashka kaa gala laguu celin maayo xataa haddii aad mar danbe guriga ka guurto. Shaqadannadu waa in gurigu yahay heer macquul ah.

**QOLAL GUUD**

Qolal guud ayaa ku yaalla guryaha EBF qaar ka mid ah, kuwaas oo ay dadka guryaha deggan ku qabsan karaan dabbaaldegga maalinta dhalashada ee carruurta iyo wixii la mid ah. La xiriir isu-duwaha degaanka ee aagga aad deggan tahay si aad qolalkaas u amaahsato/kireysato.

**KIRO GURI**

Kirada guriga waxaa la bixinayaa bil walba 1-deeda, waxaana lagu bixinayaa warqadda lacag-doonka ee la soo diro. Bishiiba mar ayaa la soo diraa warqadda lacag-doonka. Lambarka koontada ee EBF waa: 5202.05.53812. Haddii aad gashay heshiis aad lacagta jiiro ku bixinayso, waxaa ogeysiin laguu soo dirayaa 7 maalin ka hor wakhtiga loo baahan yahay in lacagta la bixiyo – lacagtana waxaa koontadaada toos looga goosanayaa 21-ka bisha (ayada oo aan goosashada wax lacag ah lagaaga qaadanayn). Markaas uma baahnid in aad jiirada ku bixisid bangiga/boostada. Haddii aad kirada la soo daahdo, annaga ayaa marka hore kuu soo dirayna warqad xusuusin ah. Haddii aad weli bixin weydo, waxaa loo gudbinayaa shirkadda lacagaha soo xaraysa (inkasso) ee degmada Bergen/LRS.

## DIBAAJI

Marka aad guriga degto, waxaan dalbannaa in dibaaji loo baxsho laba bilood oo kirada guriga ah. Lacagtaas bangigaya ayaa lagu shubayaa ama NAV ayaa dammaanad qaadaysa. Xaruntayada macaamiisha ayaad wici kartaa oo aad ka heli kartaa warbixin intaan ka badan. Haddii aan kiro guri lagugu lahayn, guriguna nadiif yahay oo aysan waxba ka hallaysnayn oo dhaawacna lahayn – markaad guurto ayaa lagu siinayaa dibaajigii aad dhigtay. Haddii aysan arrimahaasi sidaas ahayn, dibaajigaaga ayaan dalban karnaa in wax nagala siiyo.

## CUSBOONAYSIINTA KIRADA GURIGA

Dadka guryahannaga deggan intooda badan waxay haystaan heshiis kiro guri oo wakhti cayiman leh. Haddii aad haysato heshiis wakhti cayiman leh, waxay muddada kiradu ku qoran tahay qodobka 6-aad ee heshiiska kirada guriga.

Marka uu soo dhowaado wakhtigii uu dhacayay heshiiska kirada guriga, ayay EBF kuu soo diri doontaa warbixin ku saabsan cusboonaysiinta heshiiska kirada. Waa in aad Boligetaten hab elegtaroonig ah uga codsataa in laguu kordhiyo heshiiska kirada. Haddii ay Boligetaten codsigaaga aqbasho, EBF ayaad telefoon kula soo xiriiraysaa si aad uga qabsato ballan aad ku saxiixayso cusboonaysiinta heshiis-kaaga. Ogow in aan heshiiska kirada la cusboonaysiin doonin haddii shuruudihiisii la jebiyey ama kiro guri lagugu leeyahay.

## BEDDELAADDA GURIGA

Haddii ay waxyaalo waaweyn iska beddelaan xaaladda dadka guriga deggan waxaa la codsan karaa in guriga layska beddelo haddii la buuxiyo shuruudaha soo socda:

- Haddii ay is beddesho tirada dadka guriga deggan
- Jirro guriga hadda la deggan yahay ka dhigta mid aan munaasin ahayn

Codsiga beddelaadda guriga waxaa si elegtaroonig ah loogu dirayaa Boligetaten.



**KA BIXIDDA HESHIISKA KIRADA GURIGA**
Haddii aad doonayso in aad ka baxdo heshiiska kirada guriga, waa in aad hab qoraal ah nagu soo wargelisaa 30 maalin ka hor inta aadan ka guurin. Foomka waxaad ka helaysaa bogga internetka ee EBF. Muddada ka-bixista heshiiska kiradu waa 30 maalin, kuwaas oo ka billaabanaya taariikhda ay ka-bixiddu soo gaarto EBF. Marka laga guurayo waa in guriga si fiican loo nadiifiyaa, aan dhaawac ku oollin waxna ka hallaysnayn. Haddii guriga si fiican loo nadiifin waayo ama dhaawac ku yaallo ama wax ka hallaysan yihiin, adiga kireystaha ah ayaa dhaqaale ahaan arrintaas mas'uul ka ahaanaya. Waxay EBF kuu soo diri doontaa warqad ay ku doonayso kharashka dheeriga ah ee arrintaas uga baxay.

**SII KIREYNTA GURIGA**
Lama oggola in guryahannaga dad kale laga sii kireeyo (sii kireynta guriga). Waxaa guriga lagu siiyay kaddib markii aad caddaysay in aad guri u baahan tahay. Haddii aad gurigannaga sii kireyso, waxay ka dhigan tahay in ay meesha ka baxday baahidii aad guriga u qabtay. Haddii aan ogaanno in aad xeerarka jebisay, guriga iyo fursad kale oo aad guri degmo ku hesho ayaad waayo doontaa.

Waxaa mararka qaarkood la oggolaan karaa sii kireyn ku-meelgaar ah. Codsiga iyo caddaynta sababta ayaa loo dirayaa EBF. Foomka codsiga waxaad ka helaysaa bogga internetka ee EBF.

**KAALMADA GURYAHA**
Degmada Bergen iyo Bangiga guryuhu waxay leeyihiin nidaamyo lagu kaalmeeyo dadka iyo qoysaska dakhligoodu hooseeyo, kharashka guryahoodu badan yahay. Si elegtaroonig ah ayaad Boligetaten uga codsan kartaa kaalmada guryaha ee degmada iyo midda dawladda.




# WARBIXIN MUHIIM AH

**CAYAYAAN**
Cayayaanka ay ka midka yihiin jiirka, baranbarada, kutaanka, quraanjada iyo cayayaanka skjeggkre ayaa ah kuwo dhiba dadka guriga deggan, guriga/dhismaha ayayna dhaawaci karaan. Cayayaanku degdeg buu u faafaa. Haddii aad cayayaan ku aragto gurigaaga ama aagagga dadka ka dhexeeya, waxaa muhiim ah in aad isla markiiba EBF u sheegto. Lama oggola in shimbiraha la quudiyo maxaa yeelay cayayaanka ayay taasi soo jiidataa.

EBF ayaa dalbaysa ilaalada cayayaanka oo kuwaas ayaa baabbi'inaya. Waxaa muhiim ah in aad guriga ka furto dadka cayayaanka baabbi'inaya. Haddii aad shaqada hor istaagto, waxay taasi keenaysaa in ay dhibaatadu fiddo guryaha kale.

**Kutaan**

- Kutaanku waa cayayaan qiyaastii le'eg 6 mm oo guryaha gala.
- Haddii aad ka shakido in uu guriga kitaan ku jiro, waxaa muhiim ah in aad isla markiiba u sheegto EBF. Kutaanka waxaa saara dad aqoon u leh. Cayayaankaas waxba kama taraan saabbuunta iyo dhaqista midna. Guriga hagaaji oo xaaq ilaa inta ay kutaanka guriga ka saarayaan dadka cayayaanka la dagaallama.
- Calaamadaha lagu garto in uu kutaan guriga ku jiro waxaa ka mid ah in adiga ama dad qoyska ka mid ah ay isku arkaan qaniinyo ku cuncunaysa iyo/ama aad sariirta iyo geesaheeda ku aragto (dhiig ama saxaro) yar.
- Waxaad uga hortegi kartaa in uu kutaan guriga ku dhasho in aadan soo iibsan saabaan duug ah sida sariir, joodari iyo kuraas. Marka aad safar ka timaaddo waxaa wanaagsan in boorsada huufar la mariyo oo dharka lagu dhaqo kulayl gaaraya ugu yaraan 60 digrii ama in kulayliyaha lagu qallajiyo ugu yaraan laba saacadood.
- Sida caadiga ah EBF ayaa bixisa kharashka lagu saarayo kutaanka, laakiin adiga guriga deggan waxaa lagaaga baahan yahay in aad gacan ka geysato sidii loogu guulaysan lahaa saaridda kutaanka, adiga oo hagaajinaya, qashinka tuuraya oo xirxiraya dharka iyo alaabta oo dhan.



**HAWA-QAADISTA IYO KULKA**

**Musqusha**

- Musqusha qubayska si fiican u leyri marka lagu qubeysto.
- Waxaa muhiim ah in la qallajiyo dhulka iyo meelaha kale ee qoyan ee siman.
- Haddii ay derbiyada iyo dhulku muddo dheer qoyaan ahaadaan waxaa ku dhalan kara qoyaan- iyo bolol halis ah.
- Waa muhiim in musqusha xoogaa la kululeeyaa si ay u engagto.

**Kushiinka**


- Marka cuntada la karinayo waxaa muhiim ah in layriyaha la daaro oo daaqadaha la furo si hawo loo siiyo.
- Layriyaha iyo shabaqu waa in ay nadiif ahaadaan si ay u shaqeeyaan oo aan dab u dhicin.
- Biyaha ka nadiifi miiska jikada marka aad isticmaasho kaddib.
- Haraaga cuntada iyo saliidda cuntada ka ilaali waaskada kushiinka.
- Haddii aad darroor muuqda aragto, wargeli EBF.

**Layrinta guriga**

- Huurka/qoyaanka badan ee guriga wuxuu wax u dhimaa hawada gudaha guriga, wuuna ku dhaawici karaa. Waxaa sidaas darteed loo baahan yahay in aan la awdin duleellada hawada.
- Maalin walba guriga layri adiga oo daaqadaha furaya si huurku uga baxo hawo cusub na u soo gasho.
- Waa in aan daah ku dadnayn daaqadaha maalinta oo dhan.
- Waxaa muhiim ah in huurka laga saaro qolka jiifka ayada oo la furayo daaqadaha iyo dulduleellada yaryar ee gurigu hawada ka qaato [ventiler].
- Dharka ha ku qallajin guriga dhexdiisa.
- Isticmaal qolka qallajinta haddii uu gurigu kaas leeyahay. Isticmaal qolka kulayliyaha haddii uu gurigu leeyahay. Waxaa kale oo la samayn karaa in dharka xarko bannaanka lagula waro.
- Haddii aanay fursad kale jirin, dharka xarko musqusha kula war – laakiin daaqadaha ama duleellada hawadu ha furnaadeen – haddii loo baahdana kulaylka daar.
- Sariiraha iyo saabaanka kale derbiyada ha ku dhejin si aan qoyaanku u dhaawacin, waa in uu derbigu hawo helayo.
- Kulayliyayaasha waa in aan la saarin dhar, daahyo iyo wixii la mid ah, maaddaama ay dab dhalin karaan.
- Meelaha uu qoyaanku ku badan yahay waxay halis ugu jiraan in ay ku dhashaan like iyo bolol.
- Dhaawacyada likuhu guriga ayay halleeyaan oo waxay keenaan hawada gudaha oo xumaata.
- La soo xiriir EBF si talo laguu siiyo haddii aad guriga like ku aragto.

**BADBAADADA DABKA**

- Haddii uu dab kaco waxaa muhiim ah in aad taqaanno meelaha laga baxsado ee guriga.
- Waa in aad sanadkiiba hal mar beddeshaa batariga allaarmiga qiiqa. Soo-dhoweynta EBF ayaad ka soo qaadan kartaa batari cusub.
- Waa in si joogto ah loo tijaabiyaa allaarmiga qiiqa ayada oo la riixayo batoonka oo la fiirinayo in allaarmigu yeero. Haddii uu allaarmigu bixiyo shanqar biib ah, waxay taasi ka dhigan tahay in batarigu xun yahay oo loo baahan yahay in la beddelo.
- Waxaa loo baahan yahay in uu guri kasta yaallo ama haanta dab-deminta ama tuubbada biyaha ee dabka lagu demiyo. Haanta dab-deminta waa in ay guriga ka surnaataa/taallaa meel si fiican looga arkayo.
- Haanta dab-deminta waa in dhawr jeer sanadkiiba la hubiyaa (ayada oo la rogayo oo la ruxayo). Hubi in fallaarta haantu tilmaamaysa aagga cagaaran, haddii aysan aaggaas tilmaamayn la xiriir EBF.
- Intaad karto yaree duleellada derbiga ee korontada ee dheeriga ah iyo fiilooyinka korontada qaybiya.
- Dab ayaa ka dhalan kara haddii fiilo koronto lagu isticmaalo kuldhaliyayaasha korontada ku shaqeeya.
- Makiinadda raashinka ee korontada ku shaqaysa saxanka oo qabaw saar birdaawada ama dheriga oo markaas kaddib makiinadda daar.
- Waa in ay isla ekaadaan dheriga iyo saxanku. Marka ay biyuhu karkaraan, heerkulka hoos u dhig.
- Guryaha qaar ayaa waxay leeyihiin aalad ilaalisa makiinadda raashinka. Aaladda ilaalisa makiinadda raashinku waxay ka kooban tahay dareeme iyo demiye-daare, waxayna ku taallaa makiinadda raashinka dhabarkeeda ama santuukha fiyuusyada. Haddii uu dareemuhu dareemo dab, wuxuu daaraa allaarmi. Haddii allaarmigii wax ka jawaaba la waayo, markaas wuxuu dareemuhu amraa in makiinadda raashinka korontada laga gooyo. Haddii uusan dab kicin, adiga lafti-gaaga ayaa fiirin kara tilmaamaha sida loo isticmaalo oo allaarmigii mar kale xiri kara oo sidaas ayaad korontadii ku soo ceshan kartaa (tilmaamaha isticmaalka waxay ku dheggan yihiin gudaha santuuqa layriyaha iyo wax la mid ah).



**Waxyaalaha dabka dhaliya**

**Sigaarka.** Mid ka mid ah sababaha ugu badan ee dabka lagu dhinto ayaa ah sigaar lagu cabbo sariirta. Haddii aad gudaha guriga sigaar ku cabbayso waxaa muhiim ah in aad haysato sigaardamis weyn oo si fiican u fadhiya.

**Makiinadda raashinka.** Marna ha ka tegin makiinadda raashinka marka aad cunto ku karinayso.

**Shumaca ilayska.** Marna qol ha uga tegin shumac daaran. Ha isticmaalin waxyaalo shumaca la saarto oo guban kara, iyo waxyaalaha sharraxaad ah oo guban kara.

**Qalabka korontada.** Ka taxaddar qalabka yaryar ee korontada sida makiinadda kafeega iyo midda biyaha kululaysa. Korontada ka saar marka aad isticmaasho kaddib.

**Fiilooyinka korontada.** Qalab koronto oo badan iyo fiilooyin koronto oo badan iyo duleello koronto oo dheeri ah korontada ayay culays ku keenaan oo si fudud ayay dab u dhalin karaan.

**Cabbeeyayaasha.** Cabbeeyayaashu way guban karaan oo looma baahna in ay korontada ku jiraan marka aan la isticmaalayn. Telefoonka gacanta iyo qalabka kale ee korontada ku shaqeeya ha cabbayn habeenkii.

**Qallajinta.** Dharka ha ku warin kuldhaliyayaasha korontada ku shaqeeya.

**Dulduleellada kushiinka oo wasakhaysta.** Waa in aad bishiiba hal mar nadiifisaa/dhaqdaa dulduleellada marawaxadda kushiinka. Dufanka marka aad cuntada karinayso ku dhega dulduleelladu dab ayuu dhaliyaa.

**Waddooyinka lagu baxsado.** Ha xirin aagagga guryaha u dhexeeya ama marinnada jaranjarooyinka. Xusuuso in ay meelahaasi yihiin meelaha guriga looga baxo haddii uu dab dhaco.

**Haddii uu dhismaha dab ka dhaco**

**Badbaadi – digniin bixi – dabka demi:** Sida saxda ah ee ay isugu xigaan waa ka kala duwanaan kartaa oo qof iyo xaalad ba waa si.

**1. Badbaadin:** Hubi in aad u digto dadka guriga jooga oo dhan. Iska caawiya in aad guriga ka baxdaan oo haddii ay suurtaggal tahay hubi in dhammaan guriga laga baxay.

**2. Digniin bixi:** Dabdemiska u dig adiga oo ka wacaya lambarka gargaarka degdegga ah ee 110. U sheeg ciwaanka saxda ah. Ha dhigin telefoonka ilaa inta lagaa oranayo waad dhigi kartaa. Dabdemisku markaas aad la hadlaysaba jidka ayuu ku soo jiraa.

**3. Dabka demi:** Haddii uusan dabku aad u weynayn, isku day in aad demiso. Naf-taada iyo tan dadka kale midna khatar ha gelin. Xusuuso in qiiqu aad sun u yahay.



- Ka hor tag dabdemisku marka ay yimaadaan oo uga warran xaaladda. Islamarkiiba u sheeg haddii ay jiraan dad guriga ka soo bixi waayay. Adigu guriga ha gelin si aad u badbaadiso xayawaan rabbaayad ah ama ula soo baxdo alaabo aad qof ahaan u leedahay. Dabdemista u daa hawlahaas.
- Ha dhex marin qiiqa dabka. Marinka qolalka u dhexeeya ee aad mari lahayd haddii uu qiiq leeyahay guriga joog oo halkaaga caawin ku sug.
- Haddii marinka qolalka u dhexeeya uusan qiiq lahayn, bax oo meel ammaan ah tag. Dadka dabka ku dhinta intooda badan waxay ku dhintaan aagagga dadka ka dhexeeya oo qiiq miiran ah.

**Haddii uu gurigaagu gubto**

- Isku day in aad dabka ku demiso haanta dabdemiska. Gaanjada ka siib oo tuubbada ku aaddi qaybta hoose ee holaca.
- Haddii uu gurigu luuyahay tuubbada biyaha ee dabka lagu demiyo biyaha fur oo kala bixi tuubbada biyaha. Fur afka hore ee tuubbada ee ay biyuhu ka baxaan oo dabka demi adiga oo biyaha ku aaddinaya hoos oo kor u wadaya.
- Xir albaabbada iyo daaqadaha oo dhan. Albaabka xir haddii aad guriga ka baxdo. Waxaad ka hortageysaa in dabka fido.
- Haddii uu dheri gubto, dabool ama buste dhogor ka samaysan saar. Biyo ha ku shubin!
- Haddii uu allaarmigu yeero waa in aad dadka guriga ama abbaartamiintada jooga oo dhan u digtaa oo ay bannaanka u baxaan.
- Guriga aad deggan tahay haddii uu leeyahay allaarmiga dabka oo guryaha ka dhexeeya, markaas dadkoo dhan way maqlayaan allaarmiga.

**FIYUUSYADA**

- Fiyuusyadu fiilooyinka korontada ayay ka ilaaliyaan in culaysku ka bato.
- Fiyuusyada otomaatigga ah batoonka ayaa kor loo riixaa markaas ayay sidoodi ku noqonayaan.
- Haddii ay guriga ku jiraan fiyuusyada la wareejiyo waa in la beddelaa haddii ay gubteen. Soo saar fiyuuska, mid cusub oo isla noocii ah geli oo wareeji oo meesha ku rakib. Marka aad fiyuuska wareejinayso ha taaban fiyuuska qaybtiisa birta ah.



**QASHINKA**

- Qashinka haraaga ah sida haraaga cuntada iyo wixii la mid ah bac inta lagu rido ayaa afka laga xirayaa.
- Bacda qashinka qaad oo ku rid tanagga qashinka. Tanagga afka ka dabool.
- Tanagga qashinka iyo bacaha qashinka oo furan oo dhulka la dhigo waxay soo jiitaan shimbiraha iyo jiirka, nadaafadxumo ayay keenaan mana fiicna.
- Waraaqaha, baakadaha iyo kaartoonnada cabbitaanka waa in lagu ridaa weelka baakadda ka samaysan.
- Dhalooyinka, quraaradaha iyo biraha waxaa la geynayaa xarunta ugu dhow ee ay yaallaan tanagyo loogu tala galay.
- Qashinka halista ah sida riinjiga, nalalka dhaadheer, batariga iyo wixii la mid ah waxaad geyn kartaa xarunta kuugu dhow ee la geeyo qashinka halista ama xarunta dib u warshadaynta ee aqbasha qashinka noocaas ah.
- Nidaamyada ka yaalla celinta balaastiga waxaad ka baari kartaa bir.no

**BIYAHA**

- Biyaha ku aruura waaskada agagaarkeeda waa in markiiba la tirtiraa si aysan u dhaawicin jenbiga kushiinka.
- Waa muhiim in biyaha iyo qoyaanka laga tirtiro derbiyada iyo dhulka. Haddii uu qoyaankaasi sii yaallo wuxuu keenaa in hawada guduhu xumaato. Hawadaas ayaa caafimaadka u daran, marka danbana waxay guriga ku abuuri kartaa like iyo bolol.
- Biyaha ugu yar ee suuraggalka ah isticmaal marka aad guriga nadiifinayso, waxaa xataa jira waxyaalo kale oo la isticmaali karo meeshii biyo la isticmaali lahaa sida tusaale ahaan in guriga huufar la mariyo ama iskoobbe engegan.
- Kaddiifadaha waaweyn iyo wixii la mid ah guriga gudihiisa laguma dhaqi karo lagumana qallajin karo. Isticmaal qolka hoose ee dharka lagu dhaqdo haddii uu gurigu leeyahay.
- Haanta biyaha kulul ayaa kululaysa biyaha kulul ee guriga. Haddii ay biyo ka soo da'aan haanta la xiriir EBF.
- Guryaha qaar baa saxanka kushiinka hoostiisa ku leh gaanjo magnad ah. Gaanjadaas oo tuubbada xirta haddii ay biyo furmaan. Gaanjada magnadka horay bay ka shaqaysaa, oo waxaa dhici karta in ay tuubbada xirto haddii ay biyo meesha ku daataan. Degdeg bay tuubbada u xirtaa. Gaanjada magnatka ah way qaylisaa marka ay biyaha xirto. Haddii ay waxa dhacay yihiin biyo daatay, biyahaas warqad ku tirtir oo gaanjadii daar adiga oo riixaya batoonka dib-u-daaridda. Haddii ay waxa dhacay yihiin biyo darrooryay, la xiriir EBF.

**Duleellada biyaha qaada**

- Musqusha qashin ha ku ridin wuxuu doono ha ahaadee, maxaa yeelay tuubbooyinka ayaa xirmaya. Warqadda musqusha oo keliya ku rid musqusha.
- Duleellada biyaha ka qaada saxanka iyo meelaha kale ee furan waxaa xiri kara saabbuunta, haraaga cuntada iyo wixii la mid ah. Kuwaas waa in joogto meesha looga qaadaa, si biyuhu u gudbaan.
- Duleelka sagxadda adinka ayaa furi kara oo nadiifin kara. Daboolka ka qaad oo meesha ka nadiifi timaha iyo saabbuunta ku haray, oo ku rid bacda qashinka. Haddii uu duleelki weli xiran yahay waxaad ku dayi kartaa dareeraha duleellada lagu furo oo aad ka soo iibsan karto dukaanka raashinka. Markaad dareeraha ku shubto kaddib si fiican u biyo raaci.
- Haddii uu duleelki weli xiran yahay la xiriir EBF.

**MAS'UULIYADDA GUUD EE BEY'ADDA DEGAANKA**

- Kireystayaashu si wadajir ah ayay aagga dadka ka dhexeeya ee gudaha iyo dibed-da labadaba u nadiifinayaan oo u hagaajinayaan, eeg xeerarka nidaamka guryaha.
- Irridda hore, jaranjarooyinka, qolka dhaqista, qolalka kore iyo qolalka hoose waa in qashinka laga ilaaliyaa. Aagagga dadka ka dhexeeya waa in ay ahaadaan kuwo nadiif ah, hagaagsan oo la mari karo.
- Saabaanka duqoobay iyo wixii la mid ah waxaa la geynayaa xarunta dib-u-warshadaynta ee ugu dhow.
- Tixgeli deriskaaga. Waxaa loo baahan yahay in ay guriga xasillooni ka jirto wixii ka danbeeya habeenki saacadda 23.00. Ka taxaddar in waxyaalaha aad samaynayso aysan dhibayn dadka kale ee guryaha deggan.
- Waxaa wanaagsan in aad deriskaaga salaanto. Ka codso in ay kaaga warramaan waajibaadka guud ee guriga iyo warbixinnada kale ee muhiimka ah ee la xiriira guriga cusub ee aad soo degtay.
- Waxaa loo baahan yahay in goobta degaanku ahaato meel ammaan ah oo u wanaagsan dadka oo dhan da' walba oo ay yihiin. Marka aad tixgeliso dadka guriga deggan, waxaad gacan ka geysanaysaa deris-wanaagga.



# WARBIXIN MUHIIM AH

**DEGMADA BERGEN/ADEEGGA DADWEYNAHA:**
Adeegga dadweynuhu waa xarunta adeegga ee degmada, waana halka lagala soo xiriiro. Xarunta ayaa mas'uul ka ah xarunta dhexe ee telefoonnada ee degmada Bergen. Haddii aad qabto su'aal la xiriirta adeegyada degmada Bergen, la xiriir: Adeegga dadweynaha, Kaigaten 4 – way ku caawin karaan haddii aad halkaas tagto – ama aad kula xiriirto telefoon, warqad, iimayl, chat ama Facebook.

Telefoon: 55 56 55 56
Iimayl: innbyggerservice@bergen.kommune.no
Saacadaha shaqada: Saacad: 08.00 – 15.00
Bogga internetka: www.bergen.kommune.no/omkommunen/avdelinger/innbyggerservice

**BOLIGETATEN:**
Boligetaten ayaa ka baaraandegta codsiyada guryaha, kordhinta heshiiska kirada guryaha, maalgelinta iibsashada guri iyo kaalmada guryaha. Codsiyada oo dhan waxaad u diri kartaa hab elegtaroonig ah, haddii uu codsi hore kaa yaallayna waxaad wixii faallo ah ku soo diri kartaa Min side.

Telefoon: 55 56 65 76
Bogga internetka: www.bergen.kommune.no/omkommunen/avdelinger/boligetaten

**TELEFOONNADA GARGAARKA DEGDEGGA AH**
Dabka: 110
Booliska: 112
Caawin dhakhtareed 113
Dhakhaatiirta soojeedka leh: 116117

**FILIN: TALOOYIN IYO TILMAAMO LA XIRIIRA SIDII GURI DEGMO LOOGU NOOLAAN LAHAA SI FIICAN OO AMMAAN AH**
Bogga internetka ee EBF waxaa ku jira filin tilmaamo fiican kaa siinaya sidii aad gurigaaga uga taxaddari lahayd. Filinka waxaa loo turjumay 17 af.



# XEERARKA NIDAAMKA GURYAHA

**§ 1 Xasillooni iyo nidaam**
Dhammaan dadka guriga deggan waa in ay gacan ka geystaan xasilloonida iyo nidaamka. Kireystuhu waa in aanu dadka kale dhibin. Xeerarka nidaamka guryuhu waxay qabanayaan kireystaha, dadka guriga deggan iyo kuwa booqashada ku yimaada. Xeerarka nidaamka guryaha oo la jebiyo waxay keeni karaan in heshiiska laga baxo iyo in guriga layska saaro.

**§ 2 Xiridda albaabka hore**
Albaabka hore waa in uu had iyo jeer xirnaadaa. Dadka guriga soo gelaya iyo kuwa baxaya waa in ay hubiyaan in albaabku is xiray. Kireystaha ayaa mas'uul ka ah in albaabku xiran yahay marka ay dad soo booqday guriga ka baxaan.

**§3 Muustiko, TV iyo qalabka guriga iwm.**
Isticmaalka raadiyaha, TV-ga iyo aaladaha muusiggu waa in aanay ahaannin kuwo dadka kale dhiba. Laga billaabo saacadda 23.00 waxaa loo baahan yahay in ay guriga xasillooni ka jirto, lama oggola in la isticmaalo huufar, makiinadda dhardhaqidda, qalab farsamo ama hawlo kale oo shanqar abuuraya.

**§4 Anteennooyinka TV-ga iyo qalabka kale ee farsamada**
Lama oggola in anteenno TV lagu rakibo wejiga hore ee guriga, saqafka kore iyo guriga oo dhan ba. Qalabka kale ee farsamada waxaa dhismaha ama aagga bannaanka lagu rakibi karaa keliya marka oggolaasho qoraal ah laga helo EBF.

**§ 5 Xayawaanka rabbaayadda ah iwm.**
Waa in layska daayo in xayawaan guriga lagu haysto. Kireystayaasha xayawaanka haysta waa in ay hubiyaan in aysan xayawaanku dhib ku hayn dadka kale. Haddii laga soo cabto waxay taasi wax u dhimi kartaa heshiiska kirada, eeg xeerarka xasilloonida guriga § 1.

**§ 6 Maqaasiinnada**
Alaabahaaga, waxyaalo la tuuray ama qashin lama oggola in la dhigo aagagga guryaha u dhexeeya iyo jaranjarooyinka ama aagga bannaanka ah. Shay-yaasha halkaas la dhigo digniin la'aan ayaa la tuuri karaa. Alaabaha gaarka loo leeyahay waxaa la dhigan karaa maqaasiinnada laysu asteeyay. Ha isticmaalin maqaasiinnada maran ee guryaha kale.



**§ 7 Aagagga dadka ka dhexeeya**
Qolalka/aagagga dadka ka dhexeeya waa in aan loo isticmaalin ujeeddooyin kale oo aan ahayn kuwiii loogu tala galay, waana in ay had iyo jeer ahaadaan kuwo nadiif ah oo hagaagsan. Lama oggola in sigaar lagu cabbo aagagga dadka ka dhexeeya. Baaskiillada iyo baabuurta carruurta lagu riixo waxaa la dhigan karaa keliya meelaha loo asteeyay ee qolalka hoose ee guriga ama maqaasiinka qofka gaarka u ah. Qolka dhardhaqidda iyo midka dhar-qallajinta si meerto ah ayaa loo isticmaalayaa ayada oo la raacayo xeerarka u yaalla guriga gaarka ah.


**§ 8 Aallada ka digta dabka**
Dhismaha leh aaladda ka digta dabka oo guriga ka dhexeeya waxaa kireystaha waajib ku ah in uu barto sida aaladda loo isticmaalo. Tilmaamaha isticmaalku waxay suran yihiin sabbuuradda dabka/albaabka hore.

**§ 9 Balkoonnada**
Balkoonnadu waa in ay ahaadaan kuwo nadiif ah oo hagaagsan. Waxyaalaha la tuuray iyo qashinka in balkoonnada lagu kaydiyo lama oggola. Waa in aan kaddiifadaha iyo roogagga lagu jafin balkoonnada iyo daaqadaha. Lama oggola in shimbiraha cunto laga siiyo balkoonnada ama daaqadaha maaddaama ay cayayaanku soo raaci karaan.

**§ 10 Qashin**
Qashinka waxaa lagu ridayaa bac loogu tala galay kaddibna waxaa lagu ridayaa tanagyada loogu tala galay. Qolka qashinka iyo tanagyada qashinka kireystayaasha ayaa si wadajir ah u nadiifinaya.

Haraaga cuntada, xafaayadaha, calal iyo wixii la mid ah waa in aan musqusha lagu ridin. Haddii inta waxyaalahaas lagu rido ay musqushu xiranto ama ay biyo fatahdo, kireystaha ayaa dhaqaale ahaan mas'uul uga ah dhaawacaas.

**§ 11 Guryaha iskaashada/Guryo la wada leeyahay**
Haddii gurigu yahay guri iskaashato ama mid la wada leeyahay, waa in kireystuhu raacaa xeerarka nidaamka guryaha/xeerarka u yaalla iskaashatada ama guryaha la wada leeyahay.



**KUWANI MA KHUSEEYAAN GURYAHA DARYEELKA IYO KUWA DEGAAN-WADAAGGA:**

**§ 12 Nadaafadda iyo hagaajinta aagagga dadka ka dhexeeya**

Kireystaha ayaa mas'uul ka ah nadaafadda irriddiisa, jaranjarada gurigiisa ilaa iyo dabaqa xiga. Dadka deggan dabaqa 1-aad waxay dhaqayaan irriddooda ilaa albaabka hore. Waxaa loo baahan yahay in toddobaadkiiba ugu yaraan hal mar la dhaqo. Kireystayaasha oo dhan ayaa mas'uul ka ah in nadaafadda iyo hagaajinta aagga dadka ka dhexeeya, sida in ay alaabaha iyo qashinka ka qaadaan gudaha iyo bannaanka labadaba.

**§ 13 Xaaqidda, qaadidda barafka iyo dayactirka aagagga bannaanka ah**

Xaaqidda iyo haddii loo baahdo in barafka laga qaado jaranjarooyinka waddada iyo marshabiyeediga guriga hortiisa kireystayaasha ayaa laga rabaa in ay qabtaan ayaga oo si meerto ah hawsha u qabanaya hadba sidii loogu baahdo. Haddii uu gurigu leeyahay beer/ardaag gaar u ah kireystaha ayaa mas'uul ka ah hagaajinta beerta/ardaagga.



